

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Aniga oo ay taariikhdu tahay 04/01/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, lahaa Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Maarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- ABDIKAFI MOALIM HASSAN, Ina Falxado Maxamed Cilmi, Somali ah, Ku Dhashay: Afgooye, Sanadkii: 1941-09-03, Sita: Somali Passport, Lr. D00017127

LA WAKIISHE:- ABUKAR MOHAMED HASSAN, Ina: Filey Cali Xasan, Somali ah, Ku Dhashay: Marka, Sanadkii: 1965-01-01, Sita: Somali Passport, Lr. P01335996

TILMAAMAHA GURIGA

Guri oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: (Cabdicasiis), Cabirka: (1302-MQ)-M, W.M.L: (W.M.L 1217/89), Tr. 19/07/89 Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamed Cabdullahi Axmed Ciro

SOOHDINTA DHULKA

Bari: **Jid**, Koonfur: dhulka dhaxaltooyada Marxuum Cabdi Caraale, Galbeed: guriga cigaal, Waqooyi: Guri dad

B- Aniga oo ah **ABDIKAFI MOALIM HASSAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **ABUKAR MOHAMED HASSAN** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Qeybta dhaxalka aan ku leeyahay Hooyadeey Marxuumad **FALXADO MAXAMED CILMI**, oo iyaduna sii dhaxleysa Guriga uu ka geeriyooday Wiilkeeda Marxuum **AXMED MACALIN XASAN**, in Qaybtayda uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhaxalkoob u sameenkaro, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, iina saxiixi karo kaalinteen ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida Waraaqaha dhaxalkoobka, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABUKAR MOHAMED HASSAN** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeybta aan ku leeyahay hantisaas aan soo sheegay ka macamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.


T- Aniga oo ah **ABUKAR MOHAMED HASSAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **ABDIKAFI MOALIM HASSAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.


SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

ABDIKAFI MOALIM HASSAN

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABUKAR MOHAMED HASSAN





SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMED SHIRE OLOW

2- ABDULLAHI ABDITAWAB MOHAMOUD

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)




REP. 1314/T.P.N/25, Tr. 04/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **ABDIKAFI MOALIM HASSAN** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **ABUKAR MOHAMED HASSAN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.





NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



AQOONSIGA ,SAXIIXA IYO SAWIRKA WAKAALAD BIXIYAHA



AQOONSIGA IYO SAWIRKA MARKHAATIYAASHA



170/89



JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOMAALIYA

XAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO.

L. 1217

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay 5/bisha Lu-
ulyo Sanadka Kun Sagaal boqol Sideetan iyo Sagaalka
(5/7/1989), Xafiiska Notaayaha Muqdisho, oo ku ya-
alla Daarta weyn ee Xaaji Ibraahin Uunlaaye Wadada
Via-Rooma, Aniga oo ah Dr:- MAXAMED CABDULAAHI AXMED

(Cirro), Ahna Notaayo Muqdisho, Waxaa Xafiiskaas i-
igu yimid iyaga oo Heshiis ah Jaalayaasha kala ah :-

- 1)-MAXAMED SHEEKH MUUSE ku dhashay Burco 1927dii,
Deggen Xamar, ah Somaali,leh Patente N.16429/87 .
- 2)- AXMED MACALIN XASAN ku dhashay Afgooye 1946dii,
Deggen Xamar, ah Somaali,leh Patente N.20904/68 .

12/7/85
11934 Sugayshu - \$ New Kun
boqol \$ 117 Shilin
91.1067

Dadkaas Somaaliyeed oo aan wada aqoonsaday Aniga No-
taayaha ahi, iyaga oo ka tanaasulay kaalmo Markha-
atiyeed, Aniguna aan ku waafaqay waxay i weydiisteen
in aan u qoro Heshiiskan ay iigu cadeeyeen inta soo
socoto oo kala ah :- - - - -



1)- Ugu horayntii Jaalle MAXAMED SHEEKH MUUSE (Guray)
wuxuu ii cadeeyey in uu Dhul Rasmi ah uu ku leeyahay
Magaalada Muqdisho, Degmada Cabdul-casiis cabirkiisuna
yahay 1302Mq, kaasoo uu ku milkiyey Warqadda Lam:-
441689 ee 14/11/63, Dhulkaas asal ahaan wuxuu cabi-
rkiisu ahaa 3.500Mq kadib markii lagu kordhiyey Dhul-
kale ayay kala qaybsadeen dhaxaltooyada MAXAMUD CABDI

Rc
100796

CARAALE, waxaa u soo haray Milki ahaan Dhul dhan 1302Mq,

(Fiiri qoraalka ka soo baxay Maxkamadda Gobolka Banaadir Lam:-82/87 ee 10/1/88 iyo kan ka soo baxay Maxkamadda Degmada Kaaraan Lam:-176/87 ee 27/12/87 kuwaasoo wada cadaynaya isbadalka dhulka .- - - - -

2)-Wuxuu kaloo Jaalle MAXAMED SHEEKH MUUSE ii cadeeyey in dhulka cabirkiisu yahay 1302Mq uu ka iibiyey kuna wareejiyey AXMED MACALIN XASAN (Keenyaate) iyadoo qiimaha dhulka uu yahay Sh.S0.800.000/=(Sideed Boqol oo Kun oo Shilin Somaali ah), Sida ku cad-Warqadda ka soo baxday Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta Lam:-103 ee 4/7/1989 (Nulla Osta),oo dhulka lagu qiimeeyey . Wuxuu kaloo ii cadeeyey in uu wada qaatay lacagta kor ku xusan oo ah qiimaha kore ee dhulka, wax u harayna aanay jirin .- - - - -

3)- Jaalle MAXAMED SHEEKH MUUSE Wuxuu kaloo ii cadeeyey in dhulka uu ka iibshay JAALLE AXMED MACALIN XASAN (Keenyaati)uu ka madax banaan yahay wax Rahan & Xuquuq ay dad kale leeyihiin, Milkiyadiisu ay tahay mid buuxda (Piena Proprieta), Hadii ay ximahaas soo baxaan isaga ayaa ka masuul ah .- - - - -

4)-Jaalle AXMED MACALIN XASAN (Kenyata)wuxuu si gaar ah iigu cadeeyey in uu ogolaaday Iibsashada Dhulka Cabirkiisu yahay 1302Mq isla markaasna uu wada bixiyey lacagta qiimaha dhulka oo kor ku xusan .- - - - -

5)-Wixii maanta ka dambeeya waxay milkiyadda Dhulka u wareegtay Jaalle AXMED MACALIN XASAN kaasoo si sha-rci ah u qaadan doono wixii nacfi ah oo uu dhulkaas leeyahay, isla markaasna bixin doono wixii lagu ye-esho sida canshuuraha iyo wixii la mid ah .- - - - -

6)- Dhulkaas la kala iibsaday soohdimihiisu waa si-dan bari waxaa ka xiga Jid, Galbeed Guriga Cigaal, Waqooyi Guri dad, Koonfurna dhulka dhaxaltooyada MA-XAMUUD CABDI CARAALE.- - - - -

7)-Qoraalkaan oo ku qoran Hal xaanshi oo ay Labo Bog buuxdo iyo inta ku qoran boga Sadexdaad waxaa goray qof aan Aniga Notaayaha ahi aaminsanahay, waxaanana u aqriyey labada dhinac oo wada jooga, kadiib markii ay fahmeen waxa ku qoran Qoraalkaan, wayna ila wada saxiixeen dhamaantood iyagoo Raali ah .- - - - -

1)-MAXAMED SHEEKH MUUSE

Mohamed Sh. Muse *Mohamed Sh. Muse*

2)-AXMED MACALIN XASAN

N O T A A Y A H A



Dr: - MAXAMED CABDULAAHI AXMED (Cirro)

Signature of Dr. Maxamed Cabdulaahi Axmed




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 09/01/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **ABUUKAR MAXAMED HASSAN** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1314/T.P.N/25, Tr. 04/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	ABUUKAR MAXAMED HASSAN
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	1302-MQ
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Cabdicasiis
Lotto Lambar	
W.M.L	W.M.L 1217/89, Tr. 04/01/2025 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	04/01/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **ABUUKAR MAXAMED HASSAN** Sita Tel-----Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

ABUUKAR MAXAMED HASSAN
